



Tusahaaga tallaabo tallaabada ah ee kororka kirada

Maajo 2010

Ka eeg warqada xaqiiqda kororka kirada (Rent increases) wixii macluumaad dheeraad ah.

Haddii mulkiilahaagu uu yareeyo adeegyada ama tasiilaadka guriga lagu bixiyey (tusaale gasaalada la wadaago) laakiinse uusan yareyn kirada, waxaad weydiin kartaa Arimaha Isticmaalayaasha Fiktooriya (Consumer Affairs Victoria) qiimeynta kirada ka dibna gee Maxkamada.

KA BILOW HALKAN

Ma lagu siiyey ogeysiinta kororka kirada?

HAA

Kororka kiradu ma dhaqan galay 6 bilood ama wax ka badan ilaayo kororkii ugu danbeeyey?

MAYA

HAA

Haddii uu leeyahay qoraal heshiiskaaga kireysiga wakhtiga go'an oo ogolaanaya kordhinta kirada wax ka badan 6-dii bilood ee kasta ma shaqeynayo.

Laguma siin karo kordhinta kirada wax ka badan hal mar 6 -dii biloodba.

Mulkiilaha waa inuu ku siiyaa ogeysiis ah 60 maalmood oo qoraal ah waa inay isticmaalaan foomka saxda ah.

MAYA

Ma u maleynaysaa in kororka kiradu uu aad u badan yahay?

HAA

Ogeysiiska kordhinta kirada waa waxaan shaqeyneynin haddii uusan ku jirin macluumaadkan soo socda:

- > Ogeysiis ah inaad ka dalban karto Consumer Affairs Victoria 30 maalmood gudahood haddii aad u maleynaysid in kordhinta kiradu tahay saa'id
- > In ay tahay ogeysiiska kordhinta kirada
- > Cinwaanka guriga la kireeyey
- > Caddadka kirada inta la kordhiyey
- > Taariikhda ay kiradu dhaqangelayso (ugu yaraan 60 maalmood oo lagu daray 2 maalmood oo dheeraad ah haddii ogeysiiska boosta la dhigay)

Isku day inaad kala xaajooto mulkiilaha. Waxaa laga yaabaa inay ogolaadaan yareynta caddadka kororka, khaas ahaan haddii aad tahay kireyste laysku haleyn karo oo degan oo ay tahay inaad guriga ka guurto sababtoo ah ma awoodid kororka.

Warqad u qor Consumer Affairs Victoria si aad uga codsato inuu yimaado kormeere qiimeeya gurigaaga. Waa inaad ku sameysaa codsigaaga 30 maalmood gudahood markaad hesho kororka kirada.

Ku dir codsigaaga:
The Director
Consumer Affairs Victoria
GPO Box 123
Melbourne VIC 3001

MAYA

Kormeeruhu miyuu leeyahay inay kororka kiradu yahay wax badan?

HAA

Maxkamada waxay tixgelin kartaa caddadka kordhinta kirada, tirada iyo caddadka \$ ee kirada korortay ee la bixiyey 24 bilood ee la soo dhaafay. Maxkamada waxaa sidoo kale laga yaabaa in la tixgeliyo qiimaha guriga ee suuqa, goobta iyo nooca dayactirka ee guriga.

Soo ogow kirada laga bixiyo guryaha la mid ka ah ee isku meesha ah tana u isticmaal caddeynta qiimaha suuqa ee hadda.

Weydiiso nuqulka warbixinta kormeeraha si aad ugu lifaaqdo codsigaaga Victorian Civil and Administrative Tribunal (VCAT). Weydii Maxkamada ammar in kororka kiradu uu yahay xad dhaaf. Waa inaad dalbataa 30 maalmood gudahood. Maxkamada waxay amri kartaa inaan kirada gebi ahaan la kordhin ama in caddad ka yar la kordhiyo.

Bixi caddadka la kordhiyey ilaa aad ka hesho heshiiska Maxkamada. Maxkamada waxay amri kartaa in lagu celiyo wixii kira ah ee la kordhiyey oo aad bixisay.

Haddii mulkiiluhu ama wakiilku uu ku siiyey ogeysiis sax ah oo ah kordhinta kirada oo aad diido inaad bixiso, 14 maalmood ka dib waxaad ku dhici doontaa in kiro kugu baaqato. Ka eeg warqada xaqiiqda ee Iska ilaali in lagugu saaro kiro kugu ururtay (**Avoiding eviction for rent arrears**) wixii macluumaad dheeraad ah.